Kooxda Tallaabada Grenfell



Ciyaarta Muusikada Kuraasta Qaabka TMO	Yaad u malaynaysaa in uu khasaarayo marwalba

KCTMO – Hadalka Labba Afka ah iyo Miisaanka Kala Duwan ee FOI

Maalmo yar ka hor waxaa isoo gaaray iimayl iiga yimid Sinead McQuillan, hoghayaha ugu dambeeyay ee hoghayayaasha tirada dheer ee shirkada TMO, midaas oo ay ku diiday codsigayga loogu talogalay warbixinta guddiga ee ka ahaatay dhinaca KCTMO labbo iyo tobban sanno ka hor sannadkii 2005. Anigu waxaan ahaa xubin ka tirsan Guddiga Maamulka Guriga Galbeedka Lancaster xiligii warbixinta lasoo diray, cadaadis xoogan oo ka ahaada dhinaca EMB, ay soo raacayso arinta aynu oggaanay ee ah in seddex meelood labba oo ah qaybaha nalka xaalada deg-dega ahi ee ku yaala Manaarada Grenfell ay ku guuldaraysteen kormeerka joogtada ah ee ka ahaaday dhinaca TMO.

Baakadaha batariga ah ee ay ku tiirsanyihiin qaybaha nalka inta lagu guda jiro xaalada deg-dega ah waxaa loogu talogalay in ay bixiyaan aftiin kumeel gaar ah inta uu nalku go'anyahay iyo xaalada ay lagama

maar-maan noqoto qaxitaan marka uu kaco dab halis ah. Seddexdiiba labbo oo kamid ah nalalka xaalada deg-dega ahi waxay u guuldaraystaan maadaama baakadaha bateriga ay dhaafeen wakhtiga ama taariikhaha ay dhacaan oona la ilaalin ama la bedelin sannado baddan. EMB waxay u tixgeliyeen arintan wakhtigaasi in ay tahay arin aad halis u ah. Warbixinta lataliyayaasha laga soo diray dhinaca TMO waxay ahayd mid aynu isku mid nahay waxayna si xoogan muhiim ugu ahayd TMO iyo qandaraaslayaasheeda. Waxaa la oggaaday cabashooyinka EMB, kuwaas oo TMO ay diiday dhowr bilood, in si fiican loo helay oona gebi ahaanba loo xaq mariyay ama la oggolaaday.

Asalka uu ku dhisanyahay diidmada Marwo McQuillan, markii ay ahayd 14ka Luulyo, si ay ii siiso nuqul ku saabsan warbixintan waxay ahayd sheegashadeeda ah in, maadaama ay tahay TMO shirkad khaas ah oo xadidan aanan u hoggaansanayn Qaanuunka Xuriyada Macluumaadka. Iimaylka xiriirka faah-faahinaya isbedelada u dhaxeeya aniga nafsadayda iyo McQuillan waxaa si dhakhso ah dib loogu nuqul guuriyay ama loogu qoray mareegtada internetka ayada oo ay ka horayso midaan: “KCTMO – Maamulida Guriga loogu talogalay Dadka, Dadkana ka ahaata?” waxaana si macquul ah loogu doodi karaa in, ayada oo la fiirinayo xaqiridooda iska cad ee ay xaqirayaan Qaanuunka Xuriyada Macluumaadka iyo, kamid noqoshada, ku saabsan macaamiishooda ku jira Guddiga ee leh guryo bulsho ayagu xakameeyaan,KCTMO waxay ku weysay wax kasta oo xaq anshax ah ee ku saabsan sheegashada ah in ay yihiin ‘Ururka Maamulka Kiraystaha’. Weli ayagu waxay ku haystaan calaamada matalaada guddigooda waafaqsan iyo xubno kiraystayaal calooshood u shaqaystayaal ah oo doortay kuwaas oo dejiya kharashaad lacag bixin laga bad-badiyay taas oo ka fog tirada lacagta aadka u yar ee markii hore loo oggolaaday xubnaha EMB, kuwaas oo si joogto ahi looga wiiqay loogana dhigay kuwo aan awoodba lahayn dhinaca TMO, ayada oo si khiyaano ah loola shaqaynayo Guddiga RBKC.

Diidista guddiga uu diiday in uu soo dhoweeyo Heshiiska Maamulka midaas oo ay sixiixday EMB sannadkii 1993, dhowr sanno kahor inta aan la samaynin KCTMO aadka u xun, ayaa sameeyay xaaladaha hoos imaanaya, hawsha khiyaanada Guddiga, KCTMO wuxuu ka qaadi karaa EMB dhammaan awoodaheeda oo dhan. Fikradeena iyo, fikradaha inbaddan oo kamid ah dadka degan TMO kuwaas oo ay khasab ku ahayd in ay u adkaystaan sannado baddan karti la'aanta iyo dayicida TMO, xubnaha guddiga kiraystaha waa been ‘shaqo’ iska cad midaas oo kaliya loogu talogalay in lagu bixiyo sharci been ah oo ku saabsan

maslaxada-maamulka TMO, midkaas oo laga ayidey awoodna laga siiyay dhinaca Guddiga ay u adeegto mana lahaanin weligeeda waxyar oo sharci ah ama sumcad ah – xaqiiqo ay wada garanayaan macaamiisheeda sannado baddan oona hadda ugu dambaystii si guud ah loo oggaaday kadib musiibadii Manaarada Grenfell ee dhacday 14ka Juun.

Haddaba, maxay tahay arinta ku saabsan Qaanuunka Macluumaadka Xuriyada, ee hoos timaada bixinta nooca macquulka ah ee la filanayo TMO in ay usii deyso macluumaadka xiriirka la leh ammaanka dabka iyo arimo kale oo ku saabsan ammaanka iyo caafimaadka dadka deegaanka ee Guddiga leh guriga bulshada ay ayagu xakameeyaan ama maamulaan?

Bogga internetka KCTMO waxaa ku jira bogg cinwaankiisu yahay **'Access to Information' 'Gelida Macluumaadka'** midaas oo, illaa wakhti dhow, ay ku qornaayeen hadaladaan soo socda:

"Qaanuunka Ilaalinta Macluumaadka 1998 (DPA), Qaanuunka Xuriyada Macluumaadka 2000 (FOI), iyo Xeerarka Macluumaadka Deegaanka 2004 (EIR) midkaas oo suurtogal uga dhigay dadka deegaanka, iyo xubnaha dadweynaha in ay codsadaan macluumaadka ay hayaan maamulada ama maamulada loogu talogalay dadweynaha.

Waxaa la inooga baahanyahay in aynu keeno, marka la codsado qaab qoraal ah iyo mowduuca la heli karo, macluumaadka ay hayaan KCTMO, ee loogu talogalay RBKC, ee ku saabsan adeegaha lagu bixiyay magaca RBKC."

TMO Gelida Macluumaadka nuskhada 01

Mar intii lagu guda jiray dhowrkii maalmood ee tan iyo markii McQuillan ay diiday codsigayga FOI qoraalka boggaasi waa la bedelay haddana wuxuu u dhigmayaa sida tan:

"Waloow TMO ay tahay shirkad khaas ah oona u hoggaansanayn FOI, waxaa la inooga baahanyahay in aynu siino RBKC wax kasta oo macluumaad ah oo RBKC ay dhici karto in ay u baahantahay si ay ugu hoggaansanto xeerarkeeda sharciyeed ama waajibeed ay ku jirto waajib kasta oo hoos imaada FOI.

TMO sidoo kale waxay u shaqaysaa hadafkeeda ah hufnaanta xitaa waloow FOI aanan ugu hoggaansamin si toos ah arintaasi. Midaan macnaheedu waxay tahay in TMO ay sii deyn doonto macluumaadka halka ay awoodo, laakiin waxay ilaashanaysaa xaqa ah in aanan la siideynin haddii ay macquul tahay in sidaas la sameeyo, tusaale ahaan ilaalinta faa'iidooyinka ganacsiga ee TMO, ama faa'iidooyinka qolada seddexaad, ama halka siideynta ay dhici karto in ay saameyso baaritaanada dembiga, xeerarka ama kuwo kale."

TMO Gelida Macluumaadka nuskhada 02

Bishii Disembar 2014 la wadaagaha-tifatirka bogga internetka Kooxda Tallaabada Grenfell, Edward Daffarn, wuxuu ku qoray macluumaadka ay codsatay KCTMO hoosta Qaanuunka Xuriyada Macluumaadka, si gaar ah nuqulada daqiiqadaha kulamada bileedka ah ee u dhaxeeya TMO, qandaraas lahooda, Rydon, iyo naqshada mashruuca, Istuudiyaha E, iyo arimaha xiriirka la leh qorshaha Shaqooyinka Wanaajinta Manaarada Grenfell ayaa laga hadlay. Codsigiisa waxaa laga diiday dhinaca gabadhii ka horaysay McQuillan ee lagu magacaabo Fola Kafidya midaas oo sheegtay in macluumaadkan;

"… ay ka reebantahay Qaanuunka Xuriyada Macluumaadka 2000 maadaama aanan ahayn macluumaad lagu hayo magaca maamulka dadweynaha ama dhinaca TMO ee ah magaca maamulka dadweynaha. Qaanuunka Xuriyada Macluumaadka 2000 wuxuu xiriir la leeyahay macluumaadka lagu hayo magaca maamulada dadweynaha."

Si layaab leh Marwo Kafidya, isla iimaylka, waxay ugu doodaysaa mid kamid ah ka reebitaanada yar ee lagu oggolaaday hoosta Qaanuunka Xuriyada Macluumaadka (qaybta 43 qaybta hooseed 2), ayada oo sheegaysa;

" xiriirada ganacsiga TMO ay la leedahay qandaraaslayaashooda waa kuwo xasaasi ah siideynta xiriirkaasi ganacsina waxay noqonaysaa, ama waxay noqon kartaa mid khatar gelisa faa'iidooyinka ama danaha ganacsiga ee qandaraas laha."

Halkan waxaa ka dhalanaysa su'aasha soo socota: haddii Kafidya ay si dhab ahi u rumeysantahay in KCTMO aysan u hoggaansamin Qaanuunka Xuriyada Macluumaadka hadaba maxay ugu aragtay sidoo kale in ay lagama maarmaan tahay in macluumaadka uu ka reebanyahay hoosta qaybta hooseed ee Qaanuunka, ayada oo si cad u sheegaysa in ay

rumeysantahay in KCTMO ay xaqiiqdii tahay mid u hoggaansan Qaanuunka Xuriyada Macluumaadka?
Mudane Daffarn wuxuu ka jawaabay ka hortaga aasaaska liita ee hufnaanta ee ku saabsan go'aanka Marwo Kafidya, asaga oo tilmaamaya in kaliya doorka TMO ama shaqadeedu ay tahay maamulida saamiga guriga laga leeyahay dhinaca maamulka gudaha, Royal Borough ee Kensington iyo Chelsea, iyo in dhammaan macluumaadka ay hayaan ay tahay mid lagu hayo magaca maamulka gudaha oona laga reebi karin Qaanuunka. Mudane Daffarn wuxuu codsaday muraajaco ama dib u eegid lagu sameeyo diidmada lagu siideynayo aasaaskan.

Gudaha maalmo dhowr ah (wakhti ku filan in lagu sameeyo muraajaco guud oona dhab ah midaas oo looga baahanyahay sharciga) wuxuu helay diidmo kama dambays ah oo ka ahaatay dhinaca Marwo Kafidya. Si layaab leh, ayadu waxay hadda ka tagtay dhammaan wax istus ah midaas oo ah in TMO laga reebay Qaanuunka Xuriyada Macluumaadka waxayna bedelkii soo bandhigtay sababahaan soo socda in ay tahay diidmada TMO-ta;

“Waloow Rydons uu bixinayo adeeg ku saabsan faa'iidooyinka dadweynaha, xiriirada ganacsi ee TMO ay la leedahay qandaraaslayaashooda ay yihiin kuwo xasaasi ah siideynta xiriirkaasi ganacsina waxay noqonaysaa, ama waxay noqon kartaa mid khatar gelisa faa'iidooyinka ama danaha ganacsiga ee qandaraas laha. Ayada oo la raacayo qaybta 43(2) ee Qaanuunka Xuriyada Macluumaadka, macluumaadkaasi wuxuu ka reebanyahay siideynta. Midaan darteedana, anagu ma awoodno in aynu siideyno macluumaadka aad codsatay. ***Sida waafaqsan Qaanuunka Xuriyada Macluumaadka 2000 iimaylkan wuxuu u shaqeeyaa sida Oggaysiis Diidmo****.“*

Waa muhiim in la oggaado in Mudane Daffarn uu gadaal ka sameeyay codsi kale oo FOI ah midkaas oo uu u diray Marwo Kafidya bishii Maajo 2016. Markaan asaga wuxuu codsaday nuqul ku saabsan warbixin laga soo jeediyay dhinaca TMO ee loo dirayo Guddiga Guryaha iyo Laxisaabtanka Guryaha ee meesha RBKC. Markaan wuxuu helay jawaab wanaagsan:

“Ka fog codsigaaga hoos imaanaya Qaanuunka Xuriyada Macluumaadka 2000, warbixinta la siiyay Guddiga Laxisaabtanka RBKC ayaa lasoo lifaaqay si aad u fiirisid.

Fola Kafidiya-Oke FCIS
Madaxa Maamulka iyo Xoghayaha Shirkada
Royal Borough ee Kensington iyo Chelsea
Ururka Maamulka Kiraystaha Xadidan”

Waxay u muuqan kartaa in, markaan, Marwo Kafidya waxay ugu dambaystii xalisay wax kasta oo shaki ama wareer ah oo ay hore u qabtay midaas oo ahayd haddii KCTMO ay tahay, ama aanan ahayn, shirkad dadweyne oona ay tahay, ama aanan ahayn, mid u hoggaansan Qaanuunka Xuriyada Macluumaadka. Sida cad, ayadu waxay oggaatay in TMO ay tahay dhabtii shirkad dadweyne oona ay dhab ahaantii u hoggaansantahay Qaanuunka FOI.

Waxay iska casishay ama ka fadhiisatay TMO mudo yar kadib war isdhaafsiga u dambeeyay ee la yeeshay Mudane Daffarn laakiin waa muhiim in la arko waxa hadda ku qoran taariikh muuqaalkeeda Linkedin ee ku saabsan muddada ay ahayd Madaxa Maamulka iyo Xoghayaha Shirkada ee meesha KCTMO. Waxay sheegaysaa in ayadu;

“…hubsatay in kooxda ay u hoggaansantay Qaanuunka Ilaalada Macluumaadka, Qaanuunka Xuriyada Macluumaadka iyo sharciyo kale oo xiriir la leh helida ama gelida macluumaadka shirkadaha dadweynaha.”

https://uk.linkedin.com/in/folakafidiya

Daliil dheeraad ah oo ah in KCTMO ay tahay, oona marwalba ahayd, mid u hoggaansan sharciga Xuriyada Macluumaadka laga heli karo Nidaamka Daabacaada FOI (arin waajib ah oo ah u hoggaansanaanta sharciga shirkadaha dadweynaha) midaas oo markii hore laga daabacay dhinaca TMO sannadkii 2005 oona laga soo dejisan karo bogga internetka TMO. FIIRO GAAR AH Haddiiay dhacdo in uu go'aansado xoghayaha shirkada ee cusub, akhrinta boggaan internetka ah, si loo soo jiido midkale oo deg-deg ah ayada oo la tirayo dukumeentigan ka ahaaday bogga internetka TMO midkaas oo aynu kusoo shubnay nuqul aynu marhore soo dejinay:

TMO_xuriyada macluumaadka nidaamka daabacaada

Ka tegida Fola Kafidya, oona lagu bedelay Sinead McQuillan, booska TMO ee ku saabsan Macluumaadka Xuriyada waxay u muuqataa in ay noqotay wareega buuxa, ayada oo laga reebayo in sheegashada asalka ah ee ka ahaatay dhinaca Kafidya, in TMO ay kaliya masuul ka tahay qaanuunka hoos imaanaya FOIA ee loogu talogalay siideynta macluumaadka dadweynaha ay hayaan ee ku matalaan magaca maamulka gudaha, hadda waxaa lagu bedelay sheegashada ka ahaatay dhinaca McQuillan midaas oo ah in ay ayagu masuul ka yihiin bixinta macluumaadkaas oo kale, ma ahan in la siiyo dadweynaha, laakiin kaliya la siiyo maamulka gudaha lafteeda si uu uga soo baxo maamulka gudaha xeerarkeeda hoos imaada FOIA.

Si kastaba, warbixinta ka ahaatay dhinaca 2005 midaas oo aan codsaday weligeeda, inta aan oggahay, waxay ahayd mid uu haysto Guddiga, iyo masuuliyada lagu fulinayo waxyaabaha ay soo jeediyeena ma ahan mid ay dusha ka saarantahay Guddiga, laakiin waxay dusha ka saarantahay TMO midkaas oo markii horeba laga sameeyay warbixinta. Waxyaabahaan lasoo jeediyay waxaa kamid ah bedelid buuxda oo lagu sameeyo nidaamka nalka xaalada deg-dega ah ee Manaarada Grenfell iyo nidaam la horumariyay oo ku saabsan baaritaanada iyo kormeerida lagu sameeyo nidaamka cusub. Kuwa ugu horeeya ee waxyaabahaan lasoo jeediyay ah waa la dhaqan mariyay, laakiin shaki run ah ayaa weli taagan midkaas oo ku saabsan haddii nidaamka baaritaanka la horumariyay ama la cusboonaysiiyay ay dhici karto in weligiisa la fuliyay iyo, haddii la fuliyay, ma tahay mid sii jirtay muddo dheer. Isbedelo aasaasi ah oo lagu sameeyo dhaqanka maamulka ee ka jira TMO ayaa sidoo kale lasoo jeediyay, anaguna dhammaanteenu waxaynu ogsoonahay waxa uu ra'yigaasi noqday. Nada! Zilch! SNAFU!

Anaga hadda waxaa la inooga tagay ciyaar cajiib ah midaas oo ah muusikada kuraasta taas oo ka dhigaysa dadka degan TMO in ay marwalba khasaaraan sababtoo ah xeerarka ciyaarta waxaa laga dejiyay dhinaca TMO waxaana turjumay TMO. Midaan waxaa kamid ah siyaasadooda ku saabsan Qaanuunka Xuriyada Macluumaadka, ee masuulka ka ah midaas oo TMO si layaab lehi aqbasho, inta baddana diida ayada oo samaynaysa mar-marsiyo la iska raadiyo oo aan run ahayn midaas oo ah in TMO aanan ahayn shirkad dadweyne oona sidaas darteeda aanan u jawaabi karin dadweynaha ay u adeegto iyo kuwa ay siiso dhammaan adeegaha guryaha, ay ku jirto ammaanka dabka iyo dhammaan adeegaha caafimaadka iyo ammaanka.

Ma jiraan wax lagala yaabo ama loogu qoslo waxyaabaha ku saabsan ‘ciyaartan’ gaarka ah ee muusikada kuraasta. Dad aad u baddan ayaa u dhintay qaabab aad u fool xun markii ay ahayd 14ka Juun. Habbeenkaas gablamay, iyo inbaddan oo kamid ah ‘bad-baadayaasha’, waxay u argagaxeen si aad u xun waxayna weligooda inta noloshooda ka dhiman sii wadi doonaan dhaawaca nafsiyeedka soo gaaray habbeenkaasi. Hadda waxaynu haysanaa KCTMO, oo si qoto dheer ugu lug leh dayicida dambiyeed ee dhammaan arintaan sababtay, ayaga oo diiday in ay sii daayaan macluumaadka ay hayaan ee ku saabsan wax kasta oo mar-marsiyo ah oo ay heli karaan.

Qofkeen hadda ugu laabanaa jawaabaha?

Waxaa loogu laabanayaa Martin Moore-Bick? Anigu ma u malaynayo!